VERMONT DEPARTMENT OF HEALTH

# Hagitaanada Go'itaaanka Korontada ee Goobaha Cunnada

Caafimaadka cunnada waxaa saamayn kara go'itaanka korontada waayo tallaajadaha ma ku ilaalin karaan cunnada heerkulkii loo baahnaa, qalabkuna waxaa suurtogal ah inaanu shaqaynayn, biyo kulayliyayaasha elekteroonigga ahina biyo kulul masoo saari doonaan. Guud ahaan, cunnada lagu rido tallaajad ama qaboojiso waa la cuni karaa hadii korontadu go'do in kayar laba saacadood. Xidh albaabada tallaajadda iyo qaboojiyayaasha marka korontadu go'an tahay si cunnada loogu ilaaliyo qabow inta ugu badan ee suurtogalka ah. Ha diyaarinin cunnada ubaahan in la qaboojiyo. Haddii xaruntaadu ay bilaa koronto ahayd afar saacadood ama in kabadan oo aad qabto wax su'aalo ah, la xidhiidh Waaxda Caafimaadka adoo kala xidhiidhaya FoodLodging@vermont.gov ama 802-863-7221.

## Biyaha Kulul

- Hawlgallada goobaha cunnada waxaa looga baahan yahay inay yeeshay biyo kulul wakhti kasta si gacmo dhaq, nadiifin, cunno diyaarin, iwm ee saxda ah loo sameeyo.
- **Haddii ay korontadu kaa go'an tahay oo aadna haysato biyo kulayliye elekteroonig ah, waa inaad joojisaa shaqada illaa korontadu kasoo noqonayso.**

## Qalabka

- Hubi in dhammaan qalabku ammaan yahay, si sax ahna ushaqaynayo.

## Nidaamka Hawaynta

- Jooji wax karinta haddii nidaamka hawayntu aanu si sax ah ushaqaynayn.

## Agabka Wax Karinta

- Jooji isticmaalka walxaha ku keydiya walxaha kulka (hot holding units) haddii aanay shaqaynayn oo hel qaab kale si loogu ilaaliyo cunnada heerkul ka korreeya 135°F ama ka hooseeya 41°F.
- Tuur cunnada haddii qaababka saxda ah ee qaboojinta aan la raacin ama cunnada heerkulkeedu isbeddeli doono in kabadan afar saacadood.
- Tuur cunnada ay suurto gal tahay inay masiibo keento ee la karinayay, qaboojinayay ama la dib loo kulaylinayay haddii heerkulka saxda ah ama xaddidaadaha wakhtiga aan la raacin. Qor cunnada la tuuray.
- Jooji wax karinta haddii qalabka wax karinta iyo keydintu aanay shaqaynayn.

## Dabka

- Laydhku waxa uu mihiim uyahay badqabka iyo diyaarinta cunnada. Waa ay adagtahay in qalabka, maacuunta iyo oogooyinka loo nadifiyo si sax laydh la'aan.

## Saxan Dhaqaha

- Haddii saxan dhaquhu aanu shaqaynayn, isticmaal three-bay sink si aad udhaqdo, biyo raaciso, una nadiifiso maacuunta iyo qalabka. Biyo kulul waa in la helaa si xaruntu usii furnaato.
- Isticmaal single-service(ogaalka halka adeegga ah) illaa saxan dhaquhu ka shaqaynayo markale.

## Matoorka dabka dhaliya

- Matoorka dabka dhaliya, pressure washers, ama agabka kale ee gaasoliinta ku shaqeeya waxay soo saaraan carbon monoxide taasoo daqiiqado gudahood qiiq badan ku samayn karta. Haku isticmaalin agabka ku shaqeeya gaasoliinta guriga gudihiisa.
- Isticmaal single-service(ogaalka halka adeegga ah) illaa saxan dhaquhu ka shaqaynayo markale.

## Tallaajadaynta

- Laydhku waxa uu mihiim uyahay badqabka iyo diyaarinta cunnada. Waa ay adagtahay in qalabka, maacuunta iyo oogooyinka loo nadifiyo si sax laydh la'aan.
- Tallaajadayntu waa qayb mihiim ah oo ka mid ah ilaalinta badqabka cunnada. Cunnooyinka qabow waa in lagu ilaaliyaa heerkulka 41°F ama heerkul ka qabow si loo ilaaliyo badqabka cunnada.
  - Qor wakhtiga korontadu go'day.
  - Ha furin albaabada tallaajadaha iyo qaboojisooyinka si qaboowga aad ugu ilaaliso.
  - Hubi si aad uxaqiijiso in tallaajaduhu shaqaynayaan oyna heerkulkii habboonaa ahaanayaan kadib marka korontada la siraado.
  - Tuur cunnada khatarta keeni karta ee heerkulka saxda ah aan ahayn in ka badan afar saacadood ama haddii aanad garanayn muddada aanay heerkulka saxda ah ahayn. Cunnooyinka la qaboojiyo ee adkaha noqda marka la qaboojiyo dib ayaa loo qaboojin karaa haddii aanay jirin waxyeelo soo gaadhay weelka uu ku jiro.
  - Qor cunnada la tuuray.
  - Nadiifi oo wasakhda ka dil oogooyinka cunnada taabta ee ay wasakhaysay cunnada dhalaashay kahor inta aan hawsha cunno diyaarinta la bilaabin. Tani waxaa ka mid ah weelka iyo mashiinka barafka ee dhalaalay intii korontadu go'nayd.

## Hagitaanka Bleach garaynta (8.25%) ee Nadiifinta Oogooyinka

| Ujeedada | ppm | Badhax ah | Wakhtiga ay ku jirayso |
|---|---|---|---|
| Nadiifiyaha oogada cunnada taabanaysa | 50 – 200 | 1 qaado oo bleach ah / 1kii galaan ee biyaha ah*+ | 2 daqiiqo |

**Tilmaamaha barxida waxay ku salaysan yihiin tilmaamaha ku calaamadsan Lambarka Diiwaangelinta EPA 5813-100 si loo isticmaalo Clorox Regular Bleach (8.25% Sodium Hypochlorite). Raac tilmaamaha ku dul qoran marka aad nadiifinayso oogooyinka cuunada taabato iyo marka aad caadi ahaan doonayso inaad wasakh nadiifiso haddii bleach nooc kale ah la isticmaalayo.*

*+Ha isticmaalin bleach-ka adag ama urta leh.*

## Hagitaanka Qiimaynta Badeecadaha Cunno ee La Badbaadinayo

**Haddii uu shaki kaaga jiro, tuur! Cunnada waa inay fiicnaataa si ay ugu habboonaato inay dadku cunaan. Waa inaanay wasakhaysmin, laguna ilaaliyay heerkulka saxda ah, oo aanayn wasakhasnayn. Tuur cunnada si waafaqsan qawaaniinta iyo xeerarka maxalliga ah.**

| Badeecada Cuntada ah | Waxqabadka | Sharraxaadda/Tilmaamaha |
|---|---|---|
| Cunnada la tallaajadeeyay (PHF, cunnada TCS heerkul ka korreeya 41°F in ka badan afar saacadood) | Tuur | |
| Cunnada tallaajadaysan ee heerkulkeedu ka korreeyo 41°F in kayar afar saacadood | Badbaadi | Waa in la barafeeyaa ama loo wareejiyaa tallaajad si sax ah ushaqaynaysa. |
| Cunnooyinka la qaboojiyay ee adkaha noqday ee weli adkaha ah ee aan dhalaalin | Badbaadi | |
| Cunnada la qaboojiyay ee adkaha noqotay ee qayb ahaan dhalaashay ee heerkulkeedu ka hooseeyay 41°F | Badbaadi | Waa in loo wareejiyaa tallaajad si sax ah ushaqaynaysa isla markiibana la kariyaa. |
| Aan si sax ah loo qaboojin ama aan loo kulaylin | Tuur | Cunnada lagu keydiyay heerkul udhexeeya 41°F illaa 135°F waxay ka dhigi kartaa cunnada mid aan ammaan ahayn. |